مايو 2019

مركز الكتاب للبحوث والدراسات | بوصاصو – الصومال

FAHANKA LUQADDA CARABIGA EE GABDHAHA DHIGTA MACAAHIDDA SHAREECADA – BOSAASO

CILMI BAARIS

XAAWO CALI MAXAMED

TUSMO

LM	Cinwaanka	Bogga
1	Ururin	2
2	Hordhac	3
3	Sooyaal taariikheed	4
4	Faa'iidada barashada luqada carabiga	5
5	Ahmiyada luqada carabiga ay u leedahay gabdhaha	6
6	Fahanka gabdhaha ee luqada carabiga	7
7	Fahansiiyaha	10
8	Da'da gabdhaha macaahidda dugsiyada sare	15
9	Natiijooyinka gabdhaha	16
10	Isbarbar dhig	19
11	Gabogabo	20
12	Tixraacyo	22

URURIN

Qormadaan waxay ka hadlaysaa “FAHANKA LUQADDA CARABIGA EE GABDHAHA DHIGTA MACAAHIDDA SHAREECADA - BOSAASO”, waxay diiradda saaraysaa mustawaha luqadda ee gabdhaha dhigta macaahidda shareecada, iyadoo laga duulayo da’da gabdhaha, faaiidooyinka barashada luqadda, ahmiyada ay u leedahay, iwm, waxaa loo adeegsaday qormadaan manhajka daraasadda xaaladda iyo taxliilka (منهج دراسة الحالة والتحليل).

Qoraagu waxay qaybaha hore uga hadlaysaa halbeegyada ay cuskatay iyo xogta dadkii buuxiyey foomkii su’aalaha ama (questionare-ka), sidoo kale waxay iftiiminaysaa sooyaalka taariikheed ee wax barashada luqadda carabiga.

Qaybta 2aad waxay qoraagu kaga hadlaysaa faaiidada barashada luqadda ee ay u leedahay ardayga, iyo ahmiyadeeda, sidoo kale qiimaynta ay siiyeen ka qayb galayaashii xog ururinta, iyadoo xustay da’aadda gabdhaha ay cilmi baarista kusamaysay, fahansiiyaha, iyo natiijooyinka ay ka keenaan gabdhuhu maaddada luqadda carabiga.

Intaas kaddib waxay qoraagu ku muujinaysaa qaybta ugu danbaysa heerka fahanka gabdhaha iyo cidda saameynta ku leh.

Ugu dambayn waxay daraasadaan muujinaysaa baahida loo qabo xoojinta iyo adkeynta luqadda carabiga ee gabdhaha dhigta macaahidda shareecada ee Boosaaso.

HORDHAC

Ugu horreyn ilaahay baa mahad iska leh, mahad alle kaddib waxaan cilmi baaristaan ku salaynay fahanka gabdhaha macaahida dugsiyada sare ee luqada carabiga ee ku yaal magaalada Boosaaso waxaana uga hadlaynaa fahankooda luqada carabiga: naxwe, sarfi, balaaqa, adab, mahaaraat, hadaba waxaan qodobbada soo socda ku soo koobaynaa habraaca aan wax ku salaynay iyo warbixinta xog ururintii aan samaynay:

Waxaan cilmi baaristaan ku samaynay labada machad ee waawayn oo kala ah:

- MACHADKA ALQALAM- ee barashada luqada carabiyaga iyo shareecada islaamka
- IYO MACHADKA IBNU XAJAR- ee barashada shareecada islaamka.

1. Qaabka aan isticmaalnay waxa uu ahaa waxaan qaybinay su’aalo(questionaire) oo aan waydiinay gabdhaha dhigta lada machad ee aan cilmi baarista ku samaynay.
2. sharaxaada usamayn Ayaan idin lawadaagnay.
3. Machadka alqalam oo nasiiyey natiijooyinka gabdhuhu ay keenaan waxaadna ku arki doonaan baxsiga dhexdiisa sida aan u qaybinay.
4. Nooca (Jinsiga) ardayda aan su’aalaha waydiinay waxay ahaayeen dhedig bas wooyo waxaan ugu tala galnay dumarbas baxsigaan, waxayna isugu jiraan hooyooyin kuwo ah iyo kuwa gadho ah.

Ugu dambayntii gabdhaha aan cilmibaarista ku samaynayn ee aan waydiinay su’aalaha waxay u dhaxaysay da’doodu 15jir ilaa 30jir iyo wixii kabadan.

SOOYAALKA TAARIIKHEED

Sidalasheego waxay soo gaartay luqada carabiga afrika gaar ahaana soomaaliya inta uu san nabigu naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee madiina waqtigii ay saxaabadu u soo hijroodeen dulka xabashida, oo lasheego in ay ka soo dageen magaalo ka mida magaalooyinka soomaalodu dagaan oo ah SAYLAC, wixii intaas ka dambeeyana xiriir baa ka dhexeeyey soomaalida iyo wadamada carabta.

Wixii ka horeeyey nabiga soo saaritaankiisii naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaateen carabta iyo soomaalida waxaa ka dhexeeyey xiriir ganacsi, halkaas oo aan ka dheehan karno in ay soomaalidu luqada carabiga yaqaaneen oo ay la dhaqmijireen dadka ku hadla.

Markii islaamku soo gaaray soomaaliya dadkii waxay ku khasbanaadeen in ay bartaan luqada carabiga waayo waa luqada qur'aanka oo ay qur'aanka ku akhrinayaan sidoo kale salaadaha waxa lugu akhinayo waa wada carabi ducooyinku waa carabi halkaasna waxaa ka soo baxaysa in aan laga maar min barashada luqada carabiga gaar ahaana qofkatas oo muslim ah.

Wayihii hore waxaa lagu baran jiray luqada iyo cilmigoodan xalaqaat halkaas oo xooga lagu saarijiray luqada carabiga si uu ardayga ugu fududaadaan kutubta kale ee uu qaadanayo, wayihii danbe waxay culimadu soo kor dhiyeen macaahid lagu baranayo shareecada iyo luqada carabiga, ama carabiga kaliya.

Gabdhuhuna xalaqaadkaas ayey ku baran jireen luqada carabiga iyo shareecada qaybaheeda kala duwan, markii macaahida la furayna kaalinta ugu muhiimsan waxaa qaatay gabdhaha oo ah cida ugu badan oo macaahida wax ka barata kuwaas oo baranaya shareecada qaybaheeda kala duwan iyo luqada carabiga sida naxweha, sarfiga, balaaqada, adabka, maxaaraadka, qoritaanka, iyo akhriska luqada carabiga, oo ay ka baranayaan macaahid gaar u ah luqada carabiga iyo kuwa isugu jira luqada carabiga iyo shareecada barshadooda.

FAAIIDADA BARASHADA LUQADA CARABIGA

Luqada carabiga waxay u leedahay qofka muslimka ah faaiidooyin badan sigaarana waxay ugu leedahay ardayga baranay shareecada islaamka waxayna ka taageeraysaa in ay u fududaadaan qur'aanka kariimka iyo sunada rasuulka iyo qaybaha kale ee cilmiga ah oo ku qoran luqada carabiga, waxaan sadarada soo socda ku sheegi doonaa wax kamida faaiidooyinka luqada carabiga iyo faaiidooyinka ay u leedahay ardayga sheecada dhiganaya.

1) Waxaa kamida in ay tahay luqada allah subxaanohu watacaalaa uu u doortay in uu ku soo dago qur'aanka kariimka.
2) Markuu ardaygu sifiican u barto luqada carabiga iyo qawaacideeda waxaa u fududaanaya in uu ka ilaaliyo carabkiisa khaladaadka uu ku dhici lahaa iyo in uu sifiican u fahmo qur'aanka iyo sunada rasuulka.
3) Waxay u fudaynaysaa ardayga in uu fahmo luqadaha kale oo hadii uu ardayga ufududahay luqada carabiga waxaa u fudaanay in uu barto luqadaha kale.
4) Qofka muslimka ah markuu barto luqada carabiga hadii uu san carab ahay wacaa u fudaanaysa in uu fahmo oo xiriir la samayn karo dadka kale ee carabta ah iyo cidkasta oo ku hadasha.
5) Luqada carabiga waxaa ku qoran saqaafaadkii iyo cilmigii oo dhan sida fiqhiga iyo usuushiisa, xadiiska iyo musdalixiisa, caqiidadii, iyo culuumtii diiniga ahayd oo dhan.

AHMIYADA LUQADA CARABIGA AY U LEEDAHAY GABDHAHA DHIGTA

Sidii ay qiyaaseen gabdhihii aan cimbaarista ku samaynay waxay sheegeen in ay ahmiyad u leedahay luqada carabiga iyo barashadeedaba waxaana cadayn doonaa siyaabihii ay u kala qiyaaseen iyo nisbada tiri inta ay le'egtahay anagoo ka bilaabana %100 inta tiri uguna danbaysiinayna %20 kuwa yiri waana sida tan.

- Madada naxwaha waxaa yiri %100 ahmiyadan bay ii leedahay nisbo gaaraysa %55.
- Halka ay dheheen %80 ayey nooleedahay nisbo gaaraysa %33.
- Iyana waxaa yiri %60 ayey loo leedahay ahmiyad dhan nisbo dhan %9.40, waxaa ku qiyaasay %40 nisbo gaaraysa %2.33, halka ayana ay ku qiyaaseen %20 nisbo dhan %.78.
  - Maadada sarfiga waxaa %100 ku qiyaasay fahankooda arday nisbadoodu gaari %29.14.
  - Meesha ay ku qiyaaseen %80 nisbo gaaraysa %37.80, haka ayana way sheegeen in ay gaarayo fahankoodu %60 nisbo dhan %15.74.
  - Meesha ayana ay ku qiyaaseen fahankooda madada sarfiga %40 nisbo dhan %5.51,
  - Halka ayana ay ku qiyaaseen %20 arday nisbadoodu gaari %1.57.
  - Meesha aysan ka jawaabin nisbo dhan %10.24.
  - Madaada balaaqada oo waxaa ku qiyaasay ahmiyada ay u leedahay %100 arday gaarsayso nisbadoodu %21.26.
  - %80 waxaa ku sheegay ahmiyada uu u leedahay in uu gaarsiisan yahay nisbo gaaraysa %11.023, halka ay ku qiyaaseen ahmiyada maadadan %40 arday dhan %2.57.
  - Meesha ay ku qiyaaseen in ay fahmaan %20 nisbo dhan %1.78
  - Halka ay sheegeen in aysan dhigan ama aysan ka jawaabin su'aashaan nisbo gaaraysa %63.367.

FAHANKA GABDHAHA EE LUQADA CARABIGA:

Fahanka gabdhaha ee lugada carabiga way kala duwan tahay qof kastana meel bay gaar siisan yahay fahankiisu gabdhihii aan ku samaynay cilmi baaristaan waxay ahay su aasha aan waydiinay inta ay ku qiyaasi karto fahankeeda maadooyinkan nazwe, sarfi, balaaqa, oo ay kala dooranayso boqolaydaan.

FAHANKA	%20	%40	%60	%80	%100	JAWAAB LA'AAN
NAXWE	%1.57	%2.36	%11.81	%37.80	%33.86	12.60
SARFI	%0	%1.57	%18.11	%35.43	%27.56	17.72
BALAAQA	%1.57	%5.51	%7.86	%10.24	%14.73	60.62

1. Waxaan ka arkaynaa jadwalkaan in ay gabdhihii ku kala qayb sameen fahanka maadooyinka luqada carabiga naxwaha 20 waxaa ku qiyaasay fahankooda gabdho aad uyar oo ah %1.57 taasna waxay ina tusinaysaa in uu fiican yahay inta badan gabdhaha fahankooda naxwaha.
2. Sidoo kale 40 waxaa yiri iyana gabdho yar markii aan u fiirino madada sida ay ugu adagtay dad badan %2.36 ayaa ku qiyaasay in ay fahmaan boqolkiiba afartan.
3. Markii aan eegno 60 waxan aragnaa in ay ku qiyaaseen fahankooda madada naxwaha %11.81 oo ah nisbo dhexdhexaada waana fiicanyihiin markaan u fiirino mashquulka gabdhaha oo badan.
4. Sidoo kale waxaa ay nisbo aad ubadan ay ku qiyaaseen fahankooda

madad naxwaha 80 waana fiicanyahay fahankoodu waana nisbo dhan %37.8 waana qaybta ugu badan.

5. Nisbo taas u dhaw waxay ku qiyaaseen fahankooda madada naxwaha 100 waxaana la dhihi karaa fahankoodu aad ayuu u fiican yahay waxayna dhanyihiin nisbadaan %33.8.
6. Meesha aysan ka jawaabin su'aashaas nisbo gaaraysa %12.60.

   Maadada sarfiga ayna waxaan halkaan ku faahfaahinaynaa waxay ka dheheen gabdhuhu fahankooda.
7. Maadada sarfiga fahanka dhabdhuhu way fiican yihiin 20 cidna ma aysan dooran oo waa uu kasareeyaa fahankoodu sida ka muuqata cilmi baaristaan ku samaynay gabdhaha,
8. Sidoo kale gabdhaha ku qiyaasay fahankooda 40 mabadna ayana oo waxay dhan yihiin %1.57.
9. 60 waxaa ku qiyaasay fahankooda madada sarfiga nisbo badan oo dhan %18.11 oo ah nisbo badan taasna waxay ina tusinaysaa in uu fahanka gabdha ee sarfiga uu yahay dhexdhexaad.
10. Sidoo kale 80 waxaa ku qiyaasay fahankooda madada sarfiga nisbo dhan %35.43 oo ah nisbada ugu badan waan fiicanyahay fahankoodu marka aan u fiirino in aytahay mado u baahan fahan fiican.
11. Nisbadaas mida ku soo xigta waxay noqonaysaa in ay 100 ku qiyaaseen fahankooda madada sarfiga nisbo dhan %27.56 waana nisbo aad u fiican.
12. Halka ay ka jawwabin su'aashaan nisbo dhan intaan %17.72.

    Maadada balaaqada waxay ka mid ahayd maadooyinkii aan ku samaynay cilmi baarista waxayka waxaana ku qiyaaseen gabdhihii aan

xog ururinta ku samaynay sidatan.

13. Madada balaaqada madooyinka kale way ka duwan tahay oo fahanka gabdhuhu wuu ka hooseeyaa maadooyinkii hore 20 waxaa yiri %1.57, meesha ay dheheen 40 nisbo dhan %5.51 oo ah nisbo aad u badan marka loo fiiriyo madada.
14. Sidoo kale waxay ku qiyaaseen 60 nisbo dhan %7.86 waana qayb aad u badan, meesha ay ku qiyaaseen fahankooda madad balaaqada 80 nisbo dhan %10.24 oo ah nisbo aad u badan markaan u fiirino madadu in aysan aad u adkay iyo in ay u badan yihiin gabdhuhu dad dhalinyaro ah.
15. 100 waxaa ku qiyaasay fahankooda nisbo aad u yar oo dhan %14.73 waxaana halkaas ka soo baxaya in uu aad u hooseeyo fahanka gabdhaha ee madada balaaqada.
16. Halka aysan waxba ku qorin su'aashaan qayb gaaraysa %60.62 oo ah nisbo aad u badan oo kabadan kala bar sababta ay uga jawaabi waayeena waxay noqonkartaa labo sababood mid in aysan dhigan madada oo ayna gaarin iyo in aysan fahminba maadad.

FAHANSIIYAHA:

Fahansiiyaha waxaan ka dhignay markii aan samaynaynay cilmi baarista afar waxyaabood sida hoos idiinka muuqataba oo kala ah macalinka oo ay kala dooranayaan boqolayda kor ku qoran inta ay is leeyihiin macalinka ayaad wax ka fahantaa.

- %20 iyo %40 waxaa yiri gabdho ay dhantahay nisbadoodu waxayna ku jawaabeen sidaan %3.94 oo ah nisbo yar marka loo fiiriyo dadkii aan ka

aruurinay xogta iyo kala duwanaanka macalimiinta iyo qaab akhriskooda.

- %60 waxaa yiri nisbo dhan %18.11 oo ah nisbo dhexdhexaad ah waxaanna dhihi karkaa macalinka casharka laga fahmo wuu fiicanyahay.
- %80 in ay wax ka fahmaan waxaa ku gabdho nisbadoodu le'egtahay %18.9 oo nisbadii hore u dhow.
- %100 waxaa ku qiyaasay nibada ugu bada oo ah %42.51 taasna waxay ku tusinaysaa in macalinka waxwayn uu fahansiiyo ardayda gaar ahaan luqada oo ardayda badankooda ku adag.
- %12.60 gabdha dhana wayka aamuseen oo waxba kamay dooran nambaradii meesha ku qornaa taas oo ku tusinaysan in aysan macalinka waxaba ka fahmin sababta ayadu halahaato ama macalinku halahaadee.

Arinta labaad oo ah manhajka hadaan u nimaadno asna sida kii hore ayaa looga dooranaye boqlayda ku horqoran waxaana soo baxday sidatan.

- %20 nisbo dhan %3.15.
- %40 waxaa yiri asna dad dhantahay nisbadoodu %11.81 waxaana halkaas ka soo bixi kara in uu fiicanyahay manhajka buugaagta luqada carabiga ee ardayda loo dhigo.

- Meesha ay dheheen %60 gabdho ay nisbadoodu dhantahay %10.24

oo ah nisbo aad u badan.

- Sidoo kale waxaa ku qiyaasay in ay manhajka waxku fahmaan %80 gabdho dhan %13.38 oo ah nisbo fiican.

- %100 waxaa ku qiyaasay in ay manhajka wax ku fahmaan nisbo dhan %8.66 oo ah nisbada ugu yar.

- Meesha aysan kajawaabin su'aashaan nisbo dhan %52.75 oo ah nisbo ka badan kalabar.

Hadii aan u imaano fahanfiiyaha sadexaad oo ah muraajacada iyo ku celceshiga waxaa

wax ku fahma dadbadan xog uruurintaan samaynayna waxaa ka soo baxay sida tan.

- %20 waxaa qiyaasay in ay muraajacada wax ku fahmaan dad nisbadoodu le'egtahay %.79 oo ah nisbo aad u yar.
- %40 waxaa ku qiyaasay gabdho ay dhantahay nisbadoodu intan %3.93.
- Meesha ay ku qiyaaseen %60 in ay wax ku fahmaan muraajacada nisbo dhan %7.56 oo ah nisbo aad u yar marka aan u fiirino faaiidada muraajada iyo wax akhriska badan oo casharada lagu celceliyo.
- %80 waxay ku qiyaasay iyana nisbo gaaraysa %21.26.
- %100 waxaa ku qiyaasay in ay wax ku fahmaan gaar

ahaanna maadooyinka luqada carabiga nisbo gaaraysa %32.28 oo ah nisbada ugu badan.

- Meesha aysan ka jawaabi nisbo gaaraysa %33.86 oo ah qayb aad u badan marka loo eego faaiidada muraajacada taasna waxay ina tusinaysaa in aysan ardayda kala bar wax ku casharadu gaar anhaanna luuqada carabiga.

Arintii afraad ee ugu danbaysa oo ah wax akhriska ardayga hadii aan eegno ayadana xogta ka soo baxday waxay noqonaysaa sidatan.

- Ugu horay waxaa ku qiyaasay fahankooda wax akhriskooda in ay wax ku fahmaan %20 nisbo dhan %3.15.
- %40 waxaa ku

FAHANSIYE	%20	%40	%60	%80	%100
MACALIN	%3.94	%3.94	%18.11	%18.90	%42.51
MANHAJ	%3.15	%11.81	%10.24	%13.38	%8.66
MURAAJACO	%.79	%3.93	%7.56	%21.26	%32.28
AKHRISKAAGA	%3.15	%4.72	%18.91	%25.20	%25.99

dhaw aysan waxba muraajacayn saasna uu ugu adkaado qiyaasay asna nisbo dhan %4.72 oo ah nisbo aad u yar.

- %60 waxaa yiri ayana nisbo dhan %18.91.
- Sidoo kale waxaa yiri %80 dad ay gaarayso nisbadoodu %25.20 oo ah boqolkiiba afarmeelood meel.
- Ayana %100 waxaa yiri nisbo aan ka badnayntaas wax wayn ooah %25.99.
- Meesha aysan ka jawaabin su'aashaas nisbo gaaraysa %22.04 taasna waxay inna tusinkartaa in aysan badnayn wax akhriska ardayda ama in uu ku adagyahay.

ugu danbaytii hadii aan si kooban uga hadalno waxa ay gabdhuhu ku fahmaan luqada carabiga waa afarta arimood oo aan soo xusnay kana sheegnay waxa ay ka dheheen iyo qofkasta sida ay la noqotay midkastana kaalintiisa ayuu ka qaadanayaa fahansiinta sida ay ku qiyaaseen gabdhuhu kuwa hal mid wax ku fahmana wayjiraan oo aan kuwa kale dooran macalinka 100 ku fahmaan kuwana akhriskooda ayey ku fahmaan 100 kuwa kalana muraajacaday ku fahmaan 100 sidaas ayeyna ugu kala duwanaadeen fahansiiyaha.

FASALADA AAN CILMI BAARISTA KU SAMAYNAY

Form 1	Form 2	Form 3	Form 6
%3.94	%26.77	%36.22	%26.77

Gabdhaha aan cilmi baarista ku samaynay waxay isugu jireen dhawr fasal oo kala ahaa saadis, raabic, samayna waxay ahaayeen afar saani, awal, sanawi, khaamis iyo saalis majiraan oo kuwa hada

saadiska ah iyo ku raabica ah bay kala ahaayeen fasalkasta inta uu hayna gaar ayaa u sheegaynaa sida garaafka idiinka muuqata.

- Form 1 ardaydii ahaa waxay ugudbeen Form 2 simistarkaan kalin gabdho aan hal fasal ka badnayn ayaa ku qoray in ay yihiin Form 1 oo noqday nisbo dhan %3.94.
- Form 2 waxaa noqotay nisbo dhan %26.77 waxay ku qoreen in ay yihiin Form 2.
- Form 4 waana ardaydii simistarkii hore Form 3ga ahaa waxaanna qoray in ay yihiin Form 4 nisbo gaaraysa %36.22.
- Form 6 oo ah ardaydii simistarkii hore ahayd Form 5 waxa sheegay in ay yihiin Form 6 nisbo le'eg intaan %26.77.
- Waxaan qorin fasalka ay yihiim nisbo gaaraysa %6.30.

DA'DA GABDHAHA AAN CILMI BAARISTA KU SAMAYNAY:

Da'dawaxaan u qaybinay markaan cilmi baarista samaynay oo kala ah 15 ilaa 20 jir wixii u dhexeeya, 20 ilaa 25 wixii u dhexeeya, 25 ilaa 30 wixii u dhexeeya, 30 jir wixii kabada.

DA'DA AAN CILMI BAARISTA KU SAMAYNAY			
15_20 JIR	20_25 JIR	25_30 JIR	30 JIR KABADAN
%50.39	%18.90	%15.75	%10.24

- 15 ilaa 20 jir waxaa yiri nisbo dhan sidaa idiinka muuqata garaafkaan %50.39 oo ah wax ka badan kala bar taas oo natusinaysa in ay yihiin gabdhaha dhigta macaahida shareecada badankoodu dhalinyaro.
- 20 ilaa 25 jir waxaa qoray nisbo gaaraysa %18.90.
- 25 ilaa 30 jir waxaa yiri dad ay gaarayso nisbadoodu %15.75.
- 30 jir wixii kabada waxaa qoray dad ay gaaraso nisbadoodu %10.24.
- Meesha aysan ka jawaabin nisbo dhan %4.72.

NATIIJOOYINKA AY KEENAAN GABDHUHU

Cutubkaan waxaan uga hadlaynaa natiijooyinka gabdhuhuAy keenaa maadooyinka luqada carabiga oo kala ah naxwe, sarfi, balaaqa, adab, mahaaraat, mid kastana gaarkeeda ayaan u qoraynaa natiijooyinkeeda, waxaana kakeenay natiijooyinka gabdhaha dhigta macaahida alqalam iyo ibnu xajar waxaan marka hore ka hadlaynaa kuwa macadka alqalam, waxaan u qaybinaynaa natiijooyinka dhawr qaybood, 100 wixii keenay gaar baanka dhiganaa, 99 ilaa 90 gaar baan ka dhigaynaa, 89 ilaa 70 iyana gaar ayaan ka dhigaynaa, 69 ilaa 50 gaar ayaan ka dhigaynaa, 49 ilaa wixii ka hooseeya ayana gaar ayaan ka dhigaynaa.

- Ugu horayn waxaan ka hadlaynaa maadada naxwaha waxaa 100 keenay 12 qof oo isugu jira dhayr fasan oo kala duwan awal sanawi ilaa khaamis sanawi.
- 99 ilaa 90 waxaa keenay gabdho gaaraya 53 qof oo ayana isugu jira fasalo kala duwan.
- Sidoo kale waxaa keenay 89 ilaa 70 arday ay gaarayso tiradoodu 50 qof oo ayana ka mid ah arday dhigata awal sanawi ilaa khaamis sanawi.
- Ayana waxaa keenay 69 ilaa 50 gabdho ay gaarayso tiradoodu 23 arday oo ka kala yimid fasalo kala duwan,
- 49 ilaa wixii ka hooseeya waxaa keenay arday gaaraysa 8 arday oo ka mida fasalo kala duwan taas oom ina tusin karta in ay fahanka gabduhu fiicanyahay.
- Hadii aan siguud uga hadalno fahanka gabdhaha ee maadada naxwaha waxay noqonaysaa wadarta guud ee soo maxaysa markaan isku celcelino natiijooyinka gabdhaha %80 taas oo ku tusinaysa in uu yahay fahanka gabdhuhu ee maadada naxwaha %80 oo ah fahan fiican.

Maadada sarfiga ayana sidoo kale ayaan uga hadlaynaa natiijooyinka gabdhuhu ay keenaan.

- 100 waxaa keenay maadad sarfiga gabdho ay tiradoodu gaarayso 4 qof taasna waxaa keeni kara in ay u baahantahay fahan fiican iyo waqti badan oo lagu muraajeceeyo gabdhahana badankoodu ay iska mashquulsanyihiin.
- Sidoo kale waxaa keenay 99 ilaa 90 arday gabdho ah oo ay dhantahay tiradoodu 35 arday oo ka kala tirsan fasalo kala duwan awal sanawi ilaa khaamis sanawi.
- 89 ilaa 70 waxaa keenay gabdho ay gaarayso tiradoodu 78 gabdhood oo ka kala tirsan fasalo kala duwan taasna waxay ina tusin kartaa in uu san badnayn fahanka gabdhaha ee maadada sarfiga.
- Ayana waxaa keenay 69 ilaa 50 arday ay dhantahay tiradoodu 29 arday oo kala ah fasalo kala duwan, meeesha ay keeneen 2 gabdhood 49 wax ka hooseeyo.
- Hadii aan siguud ufiirino wadarta guud ee fahanka gabdhaha ee maadada sarfiga waxay noqonaysaa 79 taas oo laga fahmi karo in uu u dhexeeyo 70 ilaa 60.

Maadada mahaaraadka ayada sidaan kuwaan uga hadalnay ayaan u qayb qaybinaynaa xog uruurina kumaannan samayn sida aan samaynay naxwaha sarfiga iyo balaaqada oo aan gabdhaha xog uruurinta ku samaynay.

- 100 waxaa keenay arday ay gaarasao tiradoodu 43 gabdhood oo ka mid ah fasalo kala duwan awal sanawi ilaa khaamis sanawi.
- Ayana waxaa keenay 99 ilaa 90 gabdho ay gaarayso tiradoodu 47 gabdhood oo ka kala tirsan fasalo kala duwan.
- 89 ilaa 70 waxaa keenay maadada balaaqada gabdho gaaraya 43 gabdhood oo ka kala tirsan fasalo kala duwan.
- Meesha ay keeneen 69 ilaa 50 tiro gaaraysa 13 gabdhood oo ka kala yimid fasalo kala duwan, mana jiraan wax ka hooseeya 50 taasna waxay ina tusin kartaa in ay gabdhuhu ku fiicanyihiin maadad mahaataadka sababtuna waxay noqonkartaa fahnkooda oo fiicanniyo macalinka oo sifiican u fahansiiyaba.

  Maadada balaaqada fasalo badan ma dhigtaan oo badanaa waxaa lagu dhigaa fasakada ugu danbeeya si aysan culays u fuulin ardayda inta ay bilawga ku yihiin dugsiga sare ayna qaadanayaan maadooyin kale oo culus waxayna keenaan ardayda dhigata natiijooyinkaan.
- 100 ilaa 90 waxaa keenay gabdho ay gaarayso tiradoo du 7 qof oo kaliya.
- Meesha ay keeneen 89 ilaa 50 arday ay gaarayso tiradoodu 15 gabdhood, 2 qofna waxay keeneen 49 wax ka hooseeya.

  Maadada adabka ayana fasalo bada ma dhigtaan oo fasallada dhexe baalagu dhigtaa badanaa sababtuna waa in aan la culaysin ardayda oo aysan isku aadmin maadooyin, 100.

ISBARBAR DHIG

Waxaan is barbar dhigaynaa qiyaastii gabdhaha iyo natiijooyinkii aan helnay waxayna isugu aadayaan sidatan:

1. Ardayda keentay 100 ilaa 90 00 ay ka soo horjeedo ardayda ku qiyaastay fahankooda %100 waxaa keenay 100 ilaa 90 oo ah ardayada ugu saraysa darajo anaan ayna ku jiraan kuwii kaalmaha galay iyo arday gaaraysa 230 arday halka ayana ayku qiyaaseen fahankooda%100 arday gaaraysa 96 arday.
2. Waxaa keenay 89 ilaa 70 oo ay dhigeedu tahay arday ku qiyaastay fahankooda %80 waxaa ku qiyaasay fahankooda %80 arday dhan 106 meesha ay keeneen 89 ilaa 70 arday gaaraysa 298 arday oo ah ardayda darajada dhexe keenay.
3. 69 ilaa 50 oo ay ka soo horjeedo ardayda ku qiyaasay fahankooda %60 waxaa keenay 69 ilaa 50 arday dhan 82 arday oo ah ardayda aan dhicin lakin nitiijo yar ku baasay halka ay ku qiyaaseen fahankooda %60 arday dhan 48.
4. 49 ilaa 20 waxaa keenay arday gaaraysa 16 arday oo ah ardaydii ku dhacay maadooyinkaan meesha ay ku qiyaaseen fahankooda arday dhan 17 arday oo aan dhihi karno fahankoodu wuu liitaa waxayna u baahan yihiin in kor loo soo qaado lana caawiyo.

ASBAABTA

Fahanka gabadhaha in uu fiicnaado waxaa keenay asbaab badan oo ay ka mid tahay sida ay sheegeen:

1. macalinka oo ay ku qiyaaseen badankoodu in ay ka fahmaan %100 ilaa %80 markaasna waxaan dhihi karnaa waa sababts ugu wayn.
2. Muraajacada oo ay sheegeen in ay inbadan wax ku fahmaan %80 ilaa %60 waxayna noqonkartaa waxyabaha ay aadka ugu fahmeen.
3. Wax akhriskooda oo ay sheegeen in ay waxbadan ku fahmaan %100 ilaa %60 wlm.

GABOGABO

Ilaahay baa mahad iska leh oo nagu kaalmeeyey inaan qormadaan usoo gudbinno bulshada, waxaan ka baryeynaa inuu shaqo wajigiisa loo qabtay ka dhigo, ajarkeedana na siiyo.

Intaas kaddib waxaan kusoo gabogabaynayaa qormadaan inaan soo bandhigno natiijooyinkii kasoo baxay iyo talooyinka aan siinayno dhamaan maamulka iyo ardayda.

Natiijooyinka:

Waxaa ka soo baxay cilmi baaristaan aan ku samaynay fahanka gabdhaha natiijooyinkaan:

1. In uu fiican yahay fahanka gabdha hadii aan eegno say u badan yihiin nitiijooyinkoodu ay qiyaaseen oo ay u badanyihiin in ay ku qiyaaseen %100 ilaa %60 halkaasna waxaan ka dheehan karnaa in uu fahankoodu fiican yahay say qitaaseen.
2. Gabdhuhu waxay wax ku fahmaan dhawr shay oo kala ah macalinka, manhajka, wax akhriska, muraajaco, waxaana ugu badan oo ay wax ku fahmaan macalinka oo ay badankoodu %100 ku fahmaan, waxaa kaalinta 2aad galaya asna muraajacada oo ay sifiican wax ugu fahmaan, kaalinta 3aadna waxaa galay wax akhriska ardayga oo ay isna wax ku fahmaan waa say u qiyaaseen.
3. Da’da gabdhaha macaahid dhigta waxay u dhexaysaa 15 jir ilaa 30 jir iyo wixii

kabadan waxaana u badan da'da u dhexaysa 15 jir ilaa 30 jir oo ah gabdhaha ugu badan ee wax barta.

4. Waxaan ka helnay machadka alqalam natiijooyin ay keenaan qayb ka mida gabdha hhigta nitiijooyinkooda iyo qiyaastii aad ayey isugu dhawaayeen halkaasna waxaa ka soo baxday in uu fiicanyahay fahanka gabdhaha ee luqada carabiga hadii laga fiiriyo qiyaastoodii iyo nitiijooyinka ay keeneen.
5. Waxaan isbarbar dhig ku samaynay natiijooyinkii ay keeneen gabdhuhu iyo qiyaastii ay qiyaaseen gabdhuhu.
6. Sababta keentay fahanka gabdhaha in uu fiicnaado waxay noqon 2 sababood
7. dadaal ay baxsheen macaahidu gaar ahaana alqalam iyo dadaal ay baxsheen gabdhuhu.

Talooyinka:

1- In ay sameeyaan macaahidu daraasaad qotooyindheer oo ay ku samaynayaan fasal kasta si ay u ogaadaan inta ay gaarsiisantahay fahanka ardayda iyo waxayaabaha keenaya hadii uu fiican yahay iyo hadii uu hoos u dhacsan yahay iyo macalimiinta.
2- In ay iskaashadaan ardaydu casharadana wada akhristaan hadba say u awoodaan korna ay u soo qaadaan ardayda liita dhiirana galiyaan.
3- In ay maamulku la socdaan markasta hadba meesha uu marayo fahanka ardayda gaar ahaana gabdhaha.

TIXRAAC

1. Xog cilmibaaris oo aan ku samaynay qayb ka mida gabdhaha dhigta machadka al qalam ee barashada luqada carabiga iyo shareecada islaamka.
2. Xog cilmi baaris oo aan ku samaynay qayb ka mida gabdhaha dhigta machadka ibnu al xajar ee barashada shareecada islaamka iyo luqada carabiga.
3. Qaybka mida natiijooyinka ay gabdhuhu keenaan oo aan ka helnay maamulka machadka al qalam.